

KA JAWAABIDA BUUNDADA AAD U SARAYSA EE GALBEEDKA SEATTLE & COVID-19

Wixii ka dambeeya bilaha dayrta, sida socdaalayaasha gudaha iyo hareeraha Galbeedka Seattle iyo Duwamish Valley ay u kala gooshaan si aad ah 2020. Sanadaha soo socda, dadka u socdaalaya ama ka imaanaya gobolkaas waxay sii wadi doonaan inay saameyn ku yeeshaan ciriiriga sii kordhaya. Waxaan hubinay in jidadka gurmada ee Buundada Galbeedka Seattle ay maraan dhammaan jidadka barafka ee hadda socda. Waa tan sida aad uga caawin karto dadka iyo badeecada inay socdaan inta lagu jiro waqtigan adag: Waa tan sida aad uga caawin karto dadka iyo badeecada inay socdaan inta lagu jiro waqtigan adag:

1. Qorshee oo ka filo ciriiri waddooyinka gurmada.
2. Sii naftaada waqti dheeri ah oo aad ku gaarto meesha aad u socoto.
3. Isku day qaab gaadiid oo cusub sida socodka, baaskiil wadista, ama raacida baska. Iska ilaali inaad kaligaa gaari wadatid, haddii ay suurogal tahay.
4. U dulqaado oo u naxariiso dadka kula safraya oo tixgeli deriska ku nool hareeraha waddooyinka aad isticmaaleyso.

Waxaan sidoo kale hubinay in dhammaan goobaha baaritaanka COVID-19 ay ku jiraan Qorshaha Cimilada Dayrta. Iyo, maaddaama goobo badan lagu daray iyo hadii goobaha isbeddelaan, annagu waanu isbedeli karnaa oo waanu isku hagaajin karnaa si waafaqsan!

NABAD QAB AHAW - GAARI HA WADIN INAY TAHAY LAGAMA MAARMAAN MOOYEE

Waxaan la shaqeynaa King County Metro si aan jidadka basaska uga dhigno kuwo ka fog dhadada iyo barafka intii suurtagal ah waxaana naga go'an inaan adeegsanno dhammaan aaladaha aan gacanta ku hayno si aan u hubinno inay dadku bas ku dhex mari karaan magaalada.

Haddii aad gabi ahaanba u baahan tahay inaad baabuur kaxeeyso, fadlan taxaddar dheeraad ah samee, oo addeec dhammaan calaamadaha Jidadka xiran. Haddii waddo xiran tahay, waxay ka dhigan tahay inaysan ammaan ahayn in lagu wado gaari. Haddii aadan arki karin wax khatar ah, waxaa jiri kara baraf madow ama meel dhibaato ka baxsan aragtidaada.

Waqti qaado oo midkiinba midka kale ha daryeelo. Ha isku dayin inaad ka gudubto meelaha barafka lagu buuxiyo oo aad uga feejignaw dadka socda ama baaskiilka wata.

Xusuusnow inaad adigu masuul ka tahay inaad gawaaridaada ugu xirto silsilado ama aalado lagu kala jaro xilliga qaboobaha.

WIXII MACLUUMAAD DHEERI AH


Waaxda Gaadidka ee Seattle
www.seattle.gov/transportation/winter-weather

Macluumaad guud

<https://takewinterbystorm.org/king-county/>

2020-2021

CIMILADA DAYRTA



Seattle
Department of
Transportation

SOMALI

QORSHAHEENA DUUFAANTA DAYRTA

Gudaha Seattle, dayrtu waxay keeni kartaa roob wayn, dabaylo badan, baraf, iyo dhado. SDOT waxay kormeertaa xaaladaha si ay u hubiso inaad nabad qabtid marka duufaanta dayrtu ay dhici rabto.

- Shaqaalaheennu waxay raacaan warbixinnada cimilada 24 saacood maalintii, sannadka oo dhan, iyagoo toos ugu xiran National Weather Serviceiyo wararka tooska ah ee raadaarka Doppler.
- Waxaan isticmaalnaa aalad saadaalin ah oo ay soo saartay University of Washington laguna magacaabo SNOWWATCH si aan u ogaano sida duufaanku ugu badnaan u saameyn doono xaafadaha kala duwan. Macluumaadkani wuxuu gacan ka geysanayaa go'aaminta halka shaqaalahayaga ugu horayn looga baahan doono.
- Dareemayaasha dusha sare iyo dareemayaal kombuyuutar oo ku yaal buundooyinka magaalada ayaa bixiya hawo waqtiyaysan oo sax ah iyo heer kululka dusha wadada.
- Waxaan isticmaalnaa kaamirooyinka waqtiga dhabta ah, ee tooska u duubaya si aan u aragno xaaladaha dhabta ah ee jidadka muhiimka ah. Waxaad ka arki kartaa muuqaalka kamaradaha websaytkayaga, www.seattle.gov/travelers.

UJEEDEENU WAA INAAN ILAALINO SEATTLE INAY SI NABADGELYO AH U SOCOTO

- Intii lagu gudajiro duufaanta daran, shaqaalahayagu waxay shaqeeyaan 24/7 si ay uga nadiifiyaan jidadka ugu muhiimsan magaalada basaska iyo adeegyada gurmada.
- Ka hor inta uusan barafku bilaabmin inuu soo dhaco, shaqaalaha waxay horay ugu sii daaweynayaan jidadka muhiimka ah iyo buundooyinka ka hortagaha barafka si ay uga caawiyaan barafka inuu sameysmo.
- Marka barafku bilaabmo inuu da'o, shaqaaluhu waxay si isdaba joog ah u jeexayaan jidadkooda waxayna wadada ku shubaan cusbo meeshii loogu baahdo inta barafku sii socdo.
- Waxaa jira qiyaastii 1200 mayl haadad ah oo ah jidadka waaweyn ee Seattle. Waxay nagu qaadan kartaa ilaa 12 saacood si aan u nadiifino dhammaan dhulkan ka dib markuu istaago duufaanka.
- GPS ayaa lasocda goobaha ay joogaan cagafta iyo gawaarida xamuulka. Khariidad ku taal websaytkeena ayaa muujineysa sida dhowaan waddo loo banneeyay: www.seattle.gov/StormResponseMap

WAXAAN ISU DIYAARINAA BARAFKA SANADKA OO DHAN

Jiilaalka, waxaan tababarna shaqaalaha, sumadaynaa qalabka, waxaana lashaqeynaa iskaashatada hay'adaha maxalliga ah. Tani waxay ka dhigan tahay in shaqaalahayagu diyaar u yihiin inay shaqo aadaan marka dabaylo xoog badan, roob culus, ama dhado iyo baraf la saadaaliyo. Shaqadoodu waa inay waddooyinka ka nadiifiyaan wax kasta oo ka yimaada geedaha soo dhacay iyo laamaha dhadada iyo barafka, iyo inay hagaajiyaan calaamadaha iyo astaamaha. Waxaan sidoo kale hubineynaa in sahaydayada cusbada iyo dareeraha ka hortaga barafka ay keydsan yihiin.

BAASKIIL KU WADISTA BARAFKA DHEXDIISA

- Waxaan ka shaqeyneynaa inaan ka caawinno dadka inay baaskiil ku wareegaan markii barafku da'o. Waxaan leenahay koox loo qoondeeyay daaweynta iyo nadiifinta jidadka baaskiilka loo ilaaliyay.
- Waqti ayey qaadanaysaa in la nadiifiyo jidadka baaskiilka. Si waxtar leh, jidadka baaskiilka ayaa la nadiifiyaa ka dib marka haadka ku dhow cagaf la geliyo si looga fogaado in baraf badan lagu riixo haadka baaskiilka.
- Haddii aad go'aansato inaad baaskiil ku kaxayso barafka, fadlan ku labiso cimilada dhar dhalaalaya, laydhadh iyo koofiyad
- Xaaladaha wadooyinku way isbadali karaan wakhti kasta, sidaa darteed si tartiib u wad, isticmaal digniinta oo xasuusnow in darawalada ay ubaahan karaan waqti dheeri ah si ay ujoogsadaan oo ay mari karaan xaalado wado oo aan la aqoon

QAYBTAADA KA QAADO SI AY WADADA DHINACYADEEDU NADIIF U AHAADAAN

- Dhamaanteen waan ku wada jirnaa arrintan qof walbana wuxuu mas'uul ka yahay inuu gacan ka geysto sidii loo nadiifin lahaa dhinacyada jidka ee gurigaaga hortiiisa ama ganacsigaaga inta lagu jiro duufaanta barafka wadada.

- Waxa jira in ka badan 2,400 mayl oo dhinacyada jidadka Seattle ah, iyo shaqaalaha SDOT meel walba ma wada joogi karaan hal mar. Adiga ayaan ku tiirsanahay inaad samaysid qeybtaada si aan diirada u saarno nadiifinta hareeraha waddooyinka ee aan u dhowayn dhismooyinka sida gaarka loo leeyahay iyo nadiifinta jidadka muhiimka ah ee magaalada.
- Nadiifinta hareeraha wadada ee gurigaaga hortiiisa ama ganacsigaaga ma ahan keliya sharciga, sidoo kale waa waxa saxda ah in la sameeyo si qof walba uu si nabadgelyo ah ugu safro inta lagu jiro duufaanka barafka, gaar ahaan dadka indhoolayaasha ah, naafada, ama ay ku adagtahay inay ku socdaan.
- La hadal deriskaaga duufaanta ka hor si aad u ogaato cidda caawimaad u baahan doonta bulshadaada. Si wada jir ah uga wada shaqeeya sidii midkiinba midka kale u taageeri lahaa, lana yimaada qorshe lagu hubinayo in dhammaan hareeraha wadada xaafadaada ay yihiin kuwa nadiifa si qof walba uu si nabadgelyo ah ugu socon karo

Sida laysugu diyaariyo:

- Sii adeego ka hor intuuusan duufaanka ku dhufan. Waxaad u baahan doontaa badiilka barafka, boorso cusbada wadada ah, dhar diirran, busteyaal dheeri ah, tooshash, xirmooyinka gargaarka degdegga ah, iyo raashin saddex maalmood ah, biyo, iyo daawo loogu talagalay qoyska oo dhan.
- Kahor inta aysan barafobin, ku firdhi cusbada fadhida (ama shay kale oo deegaanka u wanaagsan) si aad uga hortagto in barafku samaysmo.
- Marka uu bilawdo barafku, badeelka ku nadiifi hareeraha wadada 12-kii saacood kasta ka hor intuuusan xanfalku isu rogin baraf. Haddii aad awoodo, noqo deris wanaagsan oo ka caawi sidii aad u nadiifin lahayd wixii daadad duufaan ah iyo dariiqyada geeska ah ee xaafadaada ama gacan u fidiso deris kasta oo u baahan kara.

TALOYINKA DEGDEGGA CIMILADA QABOوباHA

U LABBISO QABOوباHA



KAALMEEY DERISKA:

- Baneey dhinacyada lagu socdo
- Raashinka, saadka



SDOT WAXAY BARAFKA ADAG IYO BARAFKA 500 DHACA KA QAADAA JIDADKA WAAWEYN



KA QAAD DHINACYADA LAGU SOCCDO, CALEENTA, BARAFKA 500 DHACA, IYO BARAFKA ADAG



OGOW JADWALKA BASKA JIDKA BARAFKA QAADO BASKA



DHAGEYSO SAADAALINTA CIMILADA



U HOGGAANSAN CALAAMADAHA "JIDKA XERAN"



BAABUURKA:

- Wad baabuurka haddii ay tahay lagama maarmaan oo keliya
- Nadiifi dariishadaha
- Gasho lugo wanaagsan; diyaarso qalabka dhulka qabsada
- Si tartiib ah u wad
- U dhaafo masaafo badan inta u dhexeyso baabuurta



JIHEEYAHA ASTAAMAHA


DAHAB

Dhamaan wadooyinka safarka ee ka madhan dhadada iyo barafka

CAGAAR DHALAALAYA

Hal haad oo jiho kasta ah ayaa ka nadiifsan dhadada iyo barafka

Hadafkeenu waa inaan ku nadiifino wadooyinkan 12 saacadood gudahood marka laga nasto duufaanka.



SIDEE AYAAN U DOORANAA JIDADKA BARAFKA

Intii lagu gudajiro dufaan baraf oo weyn, waxaan mudnaan siineynaa xaaqida 1,200 mayl oo ah dariiqyada ugu muhiimsan Seattle ee isbitaalada, iskuulada, adeegyada gurmadka, hoyga, iyo shaqaalaysiiyaasha waaweyn.

Meel walba ma wada joogi karno hal mar, wadooyin badanna waa cidhiidhi oo si ammaan ah looma xaaqi karaa. Buuraha ayaa ah caqabad weyn mana jiraan had iyo jeer meel bannaan oo cagaftu ay marto iyada oo aan baabuurta waxyeello loo geysan ama lagu aasin barafka hoostiisa.

Washington State Department of Transportation ayaa mas'uul ka ah xaaqidda waddooyinka waaweyn iyo jidadka waaweyn. Waxaan si dhow uga wada shaqeyneynaa anagoo iskaashanayna si aan u hubino inuu jiro qorshe wanaagsan si aad si nabadgelyo leh ugu dhex socoto.

